

# Waalidiinta oo lala xiriiraayo in ay noqdaan kuwo qayb ka qaata waxbarashada

**Waxaa waqtiigaan xaadirka la aqbalaayaa codsiga waalidka si ay u helaan**

## DEEQAHA PARENTS REACHING OUT (GACANSIINTA WAALIDKA)

Deeqaha Parents Reaching Out ee waalidiinta waxay ka gargaartaa waalidiinta helitaanka xal deegaanka ah si ay waalidiinta kale uga gargaaran kaqaybgalka ee uga taageeri lahaayeen ilmahooda ku-guulaysiga dugsiga.

### Waxaa jira laba nooc oo ah deeqaha Parents Reaching :

- 1) **Deeqaha dugsiyada** waxaa la siinaayaa goleyaasha dugsiyada. Goleyaashu dugsiyadu waxay codsan karaan deeqaha si ay wax uga tarto talaabooyinka ku wajahan sidii loo gaari lahaa waalidka caqabaduhu ka horjoogaan qayb ka qaadashada waxbarashada ilmahooda sida dhinaca luqadda, ama iyagoon fahamsanayn nidaamka dugsiyada ee Ontario iyo sababa kaleba.
- 2) **Deeqaha loogu talagalay mashaaricda goboloda** ayaa iyana ay heli karaan ururada waalidiinta, hay'adaha aan faa'iido-doonka ahayn iyo goobaha waxbarasho ee ka danbeeya dugsiyada sare ee la shaqaynaayaa waalidiinta.

### Waa kuwee mashaariicda lagu maalgaliyo barnaamijka deeqaha Parents Reaching Out?

Kumanyaal maashaariic ayaa Ontario laga maalgaliyaa. Waxaana ka mid ah:

- “*Their Success Depends on Us!*” ee Dugsiga Gaarka ah ee St Gregory – Powassan (Guddiga Degmo Dugsiyeedka Katholiga ah ee Nippissing Parry Sound)

Waa Xarun Taageero Waalid oo siisa walidiinta kulan-hawleedyo ay qabtaan iyo khayraad daboolaya macluumaad sida xidhiidhka hufan ee dugsiga iyo guriga iyo weliba taageero xagga fahamka xisaabta waalidiinta si ay uga gargaaraan ilmahooda ku-guulaysiga dugsiga.

- “*Books for Breakfast*” ee Dugsiga Dadweynaha CC Carrothers – London (Guddiga Degmo Dugsiyeedka Thames Valley)

Taxane kullano quraac iyo wax-akhris ah ee waalidiinta iyo carruurta. Qoraayo marti ah ayaa la hadlay waalidiinta iyo carruurta muddadii kullanada quraacda oo dabeedna siiyey barnaamij kooban waalidiinta oo lagag hadlay siyaabaha ay u dhisayaan ee u kobcinayaan xirfadaha aqoonta ee jeclaysiga akhriska.

- “*Homework Survival Strategies*” ee Dugsiga Dadweynaha Britannia (Guddiga Degmo Dugsiyeedka Peel)

Kullan-hawleedyo waalidiinta ah oo ku wajahan tabaha shaqad-guriga, barashada ilmahaaga, xirfado waalidinimo iyo sida looga taageero ilmahaaga shaqada dugsiga ee guriga dhexdiisa.

- **Faahfaahin inta dheer ka akhri sheekooyinka guuleysi ee ku saabsan Parents Reaching Out**  
[www.edu.gov.on.ca/eng/parents/success.html](http://www.edu.gov.on.ca/eng/parents/success.html)

- **Sida loo dalbado:**  
Macaluumaad dheeri ah iyo foomamka codsiga waxaad ka heli kartaa  
[www.edu.gov.on.ca/eng/parents/reaching.html](http://www.edu.gov.on.ca/eng/parents/reaching.html)

- **Su'aalo?**  
Haddii aad rabto xog dheeri ah oo ku saabsan barnaamijkaan, fadlan wac **416 325-2929** ama teleefonka lacag la'aanta ah ee **1-800-387-5514**. Dadka dhagaha la' ha waceen **1800-268-7095**. Haddii aad rabto caawimaad dhinaca farsamada ah oo ku saabsan foomka codsiga, fadlan su'aalahaga u soo dir [support@smartsimple.com](mailto:support@smartsimple.com).